

Refugee Council

help and advice



Somali

Xidhmo war oo qaxootiga loogu talagalay

March 2010

Hordhac

Xidhmadan war ujeedadiisu waxa weeye in la gargaaro dadka magangalyo weydiistay Boqortooyada Midowday (UK) ee la siiyay oggalaansho joogitaan. Haddii aad haysatid oggalaansho qaxooti (refugee status), oggalaansho badbaadin bini'aadan (humanitarian protection), oggalaansho ku-meel-gaadhsiis ah (discretionary leave) ama oggalaanshaha joogitaan aan xad lahayn (indefinite leave to remain) guud ahaan waxa aad leedahay isla xuquuqda iyo u-banaanaanta adeegyada ee ay leeyihiin deganeyaasha iyo muwaadiniinta UK ee kale. Imminka waxa aad oggalaansho u haysataa inaad shaqeytid, waxa aad isticmaali kartaa adeegyada caafimaadka waxana aad codsan kartaa hoy iyo manfaca gargaarka adiga oo taa kala siman deganeyaasha kale ee UK. Fadlan la soco haddii oggalaanshahaaga joogitaanka uu dhacayo dhawrka bilood ee soo socda waxa aad u baahan tahay inaad heshid la-talin sharci oo ku saabsan dheereynta joogitaankaaga, eeg qaybta 9, La-talin sharci.

Warka ku jira xidhmadan looguma talogalin inuu ahaado mid dhameystiran sababta oo ah qof kasta xaaladihiisu waa u gaar waxana qof kastaa u baahan doonaa noocyo kala duwan oo ah talo. Hase yeeshee, waxa aanu rajeynaynaa in warka halkan ku yaala uu kaa gargaari doono qaar ka mid ah walaacyadaada soke.

Waxa jira tiro ah ururo kuwaasoo ku siin kara talo sii faahfaahsan sida adeegga La-talinta Muwaadiniinta (Citizen's Advice). Waxa muhiim ah inaad ogaatid adeegyada aad ka heli kartid degmadaada. Waxa aad xidhmadan ka heli doontaa warka la-xidhiidhista ee Xafiiska La-talinta Muwaadiniinta (Citizens Advice Bureau), Xarunta Shaqada ee loo yaqaano Jobcentre Plus, Xarunta Sharciga (Law Centre) iyo xafiiska Hoyga (Housing office) ee degmadaada. Xidhmadan waxa kale oo aanu ku soo qornay tiro ah goobo ama baro internet oo faa'iido leh. Haddii aanad kombiyuutar haysan, waxa laga yaabaa inaad mid ka isticmaali kartid laybareeriga degmadaada ama xarun beeled.

Tusmada

Xidhmadan waxa aad ka heli doontaa war ku saabsan:

1. dokumentiyada dawladda
2. Gargaarka dhaqaale (Welfare benefits) iyo cashuur dhaafista (tax credits)
3. Hoyga
4. Daryeelka caafimaadka
5. Waxbarashada dadka waaweyn
6. Dokumentiyada safarka
7. Isu-keenista qoyska
8. Furashada xisaab bangi
9. La-talin sharci

Meesha laga helo talo

Imminka mar haddii lagu siiyay oggalaansho aad ku joogtid UK waxa muhiim ah inaad heshid gargaar iyo talo ku saabsan sidii aad ku heli lahayd adeegyada aad xaqa u leedahay. Waxa jira hay'ado ama ururo badan oo bixiya talo iyo war bilaash ah. Helitaanka talo waxay qaadan kartaa wakhti, sidaa daraadeed diyaar u noqo inaad sugtid ama xiitaa aad soo noqotid maalin kale. Xusuuso inaad soo qaadatid dokumentiyo shakhsi sida dokumentiyada Hay'adda Xuduudka ee UK (UK Border Agency) iyo waraaqaha ka yimi hay'ado kale.

Turjubaano

Haddii aanad ku hadli karin Ingiriisi waxa aad hay'adaha weydiisan kartaa inay ku siiyaan turjubaan. Hay'ado degmada ah iyo kuwo dawladda oo badan oo laga rabo inay bixiyaan turjubaano si loo habsado inaad heshid adeegyada aad u baahan tahay.

Ilo war

War ku saabsan tababar iyo shaqo, hoy, gargaarka dhaqaale (welfare benefits) iyo mawduucyo kale oo ku qoran luqadaha qaxootiga ayaa laga heli karaa: <http://languages.refugeecouncil.org.uk> Tilmaan iyo talo-bixin balaadhan oo ku saabsan mawduucyo ay ka mid yihiin shaqo, hoy ama nidaamka sharciga ayaa laga heli karaa: www.citizensadvice.org.uk (waa Ingiriisi kaliya). Waxay u badan tahay in laybareeriga degmadaada ama barta internetka ee maamulka degmadaada ay ku yaalaan war badan oo faa'iido leh.

Warka ku yaala xidhmadan waxa uu ahaa sax wakhtigii daabacaadda waxana laga yaabaa in isbeddel ku dhaco wakhti dambe.

Haddii go'aan lagaa siiyay sheegashadaada magangalyo oo aad ku nooshahay hoy ay bixisay Hay'adda Xuduudka ee UK (UK Border Agency - UKBA) oo/ama aad heshid taageerada UKBA, taasi waxay dhamaan doontaa ka dib 28 maalmood. Waxa lagaa rabaa inaad ka baxdid hoygaaga oo aad heshid taageero kale.

1. Dukumentiyada dawladda

Marka aad codsatid shaqo ama gargaar dhaqaale (welfare benefits) ama hoy waxa lagu weydiin doonaa inaad cadeysid qofka aad tahay iyo xuquuqda aad u leedahay adeegyadaas. Halkan soo socota waxa ku yaala liis ah dukumentiyoy ay tahay inaad heshid marka lagu siiyo oggalaansho aad ku jooftid UK kuwaas oo lagaa rabi karo inaad tustid cidda aad wax ka codsanaysid:

Go'aanka warqadda sheegashada magangalyada

Haddii go'aan aqbalaad ah lagaa siiyo sheegashadaada magangalyo, Hay'adda Xuduudka ee UK (UK Border Agency - UKBA) ayaa warqad kuu soo qori doonta. Warqaddu waxay kuu sheegi doontaa oggalaanshaha ama sharciga lagu siiyay: oggalaansho qaxooti (refugee status), oggalaansho badbaadin bini'aadan, oggalaansho ku-meel-gaadhshiis ah ama oggalaansho joogitaan aan xad lahayn. Warqaddaasi ma aha cadeyn in lagu siiyay go'aan aqbalaad ah.

Dokumentiga Sharciga Imigarayshanka

Tani waa warqadda rasmiga ah ee ay bixisay UKBA ee xaqiijinaya aqoonsigaaga iyo sharcigaaga ama xaaladdaada imigarayshanka. Waxa ku ooli doona sawirkaaga, faahfaahintaada shakhsi, xaaladdaada iyo mudada oggalaanshahaaga. Waa inaad heshid dokumentigaas isla ka dib marka aad heshid warqadda go'aanka aqbalaadda ah. Haddii aanad heli dokumentigaas waa inaad wacdid lambarka teleefonka ee ku yaalaa warqaddaada Go'aanka sheegashada magangalyo (Determination of asylum claim letter) si aad u weydiisatid. Waxa dhici karta in UKBA kaaga baahato inaad u soo soo dirtid sawiro si ay kuugu sameeyaan dokumentigan. Dokumentigani waa cadeyn in lagu siiyay go'aan aqbalaad ah.

Warqadda Joojinta ee NASS (NASS Termination Letter)

Haddii aad taageero dhaqaale/hoy ka heli jirtay UKBA, oo go'aan lagaa siiyay sheegashadaada, taageeradaasi waxay joogsan doontaa 28 maalmood ka dib. UKBA ayaa warqad kuu soo qori doonta sheegaysa marka taageeradaasi joogsan doonto iyo goorta aad heli doontid siinta ugu dambaysa. Warqaddaasi cadeyn uma ah in taageeradii UKBA dhamaatay.

NASS 35

UKBA ayaa kuu soo diri doonta foomkan ama warqaddan marka lagu siiyo go'aan haddii aad qaadan jirtay taageerada UKBA. Warqaddan waxa ooli doona sawirkaaga iyo waxana ay sheegi doontaa taageerada aad heshay. Tan ayaad u baahan tahay ka hor inta aanad helin gargaar dhaqaale (welfare benefits) iyo hoy. Haddii lagu sheegay in taageeradii mangangalyada ay kaa dhamaanayso laakiin aanad helin dokumentigan wac: 0845 602 1739.

Lambarka Caymiska Qaranka (National Insurance number)

Lambarka Caymiska Qaranka (National Insurance - NI) waa lambar tixraac shakhsi oo aad u baahan doontid si aad u shaqeysid ama taageero u heshid gudaha UK. Waxa laga yaabaa in UKBA ay kuu codsatay lambarka NI. Hubi adiga oo wacaya lambarka teleefonka ee ku yaala warqadda ku siinaysa oggalaanshaha ama sharciga oo weydii in ay kuu codsadeen lambarkaas. Haddii UKBA aanay kuu codsan lambar NI, oo aad u baahan tahay inaad shaqeysid, wac 0845 6000 643 si aad u codsatid. Waxa lagu weydiin doonaa inaad wareysi u tagtid Xarunta Shaqada (Jobcentre Plus) (eeg qaybta 2). Waxa muhiim ah inaad dhakhso u heshid lambarka NI.

Fadlan la soco in aanad dukumentiyadaada asalka ah ku soo dirin boosta haddii aan sidaas lagu weydiisan. Haddii ay qasab tahay in aad boosta ku dirtid dukumentiyada asal ah, weydii Xafiiska Boosta habka 'boosta diiwaansan' (registered post). Marrar badan ayaa la aqbali doonaa koobiyo ah dukumentiyadaada asalka ah.

2. Gargaarka Dhaqaale (Welfare benefits) iyo cashuur dhaafista (tax credits)

Dawladda UK waxay taageeri kartaa dadka aan lahayn wax dakhli ah iyada oo bixinaysa guno nololeed aasaasi ah. Guno nololeedaas aasaasiga waxa loo yaqaana 'welfare benefit.'

Waxa kale oo ay dawladdu taageeri kartaa dadka shaqeeya laakiin dakhliga soo galaa yar yahay iyada oo ay dawladdu siinayso cashuur dhaafis.

Waxa codsigaygii mangalyada la iga siiyay go'aan aqbalaad ah waxana aan u baahanahay xoogaa taageero ah; sidee baan ku heli karaa gargaar dhaqaale (welfare benefit)?

Dadka haysta oggalaansho qaxooti, badbaadin bini'aadan, oggalaansho ku-meel-gaadhsiis ah ama oggalaansho joogitaan aan xad lahayn waxay heli karaan gargaar dhaqaale. Haddii aad rabtid taageero sababta oo ah hadda ma shaqeysid mana lihid dakhli, waa inaad warkaas siisid waaxda dawladda ee loo yaqaano Jobcentre Plus. Waxa tan loo yaqaanaa 'sameyn sheegasho' (making a claim) ama codsasho gargaar dhaqaale.

Qadarka gargaar dhaqaale ee aad heli kartid waxa uu ku xidhan yahay xaaladahaaga shakhsiyeed; haddii aad qof is qabtaan ama aad caruur leedahay, waxa laga yaabaa in taasi beddesho qadarka.

Waxa jira saddex jira nooc oo ah gargaar dhaqaale oo aasaasi ah oo loogu talagalay dadka shaqeeya. Waxay bixiyaan guno nololeed aasaasi ah oo aad heli doontid laba todobaad kasta. Waxay kala yihiin:

- **Gunada Shaqo-doonka (Jobseeker's Allowance)**

Lacagtan waxa loogu talagalay dadka awooda inay shaqeeyaan ee raadinaya shaqo laakiin aan haysan shaqo. Qofku waxa uu heli karaa gargaarkan dhaqaale haddii uu Jobcentre u cadeyn karo inuu raadinayay shaqo.

Waxa aad tagi kartaa koleejka ama fasal ah Ingiriisi oo ugu badnaan ah 16 saacadood todobaadkii adiga oo qaata Gunada Shaqo-doonka. Waxa kale oo aad Gunada Shaqo-doonka heli kartaa haddii aad shaqeysid wax ka yar 16 saacadood todobaad kasta.

- **Gunada Taageerada Shaqada (Employment Support Allowance)**

Lacagtan waxa loogu talagalay dadka aan shaqeyn karin sababta oo ah waxa haya cudur ama naafo ku adkeynaysa inay shaqeeyaan. Waa inaad marag-kac dhakhtar (sick note) ka keentid dhakhtarkaaga haddii aad rabtid inaad weydiisatid gargaarkan dhaqaale. Xaruntaada Shaqadu (Jobcentre) waxay go'aan ku gaadhi kartaa inaad shaqeyn kartid, xiitaa haddii aad qabtid cudur ama naafo. Haddii ay taas go'aan ku gaadhaan waxay joojin karaan lacagtaada gargaarka dhaqaale.

- **Taageero Dakhli (Income Support)**

Lacagtan waxa loogu talagalay waalidka kali ah ee leh caruur da' yar. Sababta ay dawladdu lacagtan u bixiso waxa weeye iyada oo rumeysan inay si weyn dhib ugu tahay waalidka kali ah inay kaligood daryeelaan caruurtooda. Waalidka kali ah lagama rabo inay Xarunta Shaqada u muujiyaan inay raadiyeen shaqo.

Dadka leh sharci ama oggalaansho qaxooti ee joogay UK mudo ka yar 1 sanno waxay codsan karaan Taageero Dakhli oo ay Ingiriisi ku baran karaan wakhti buuxa. Waa inaad dhigatid kooras Ingiriisi ah oo buuxa (wax ka badan 16 saacadood todobaadkii) ka hor inta aanad codsan Taageero Dakhli.

Marmarka qaarkood wakhti badan bay kugu qaadan kartaa inaad meel ka heshid kooras Ingiriisi ah oo ah wakhti buuxa. Haddii aad rabtid inaad codsatid Taageero Dakhli, waxa laga yaabaa inaad marka hore codsatid nooc kale oo ah gargaar dhaqaale, inta aad sugaysid inaad meel ka heshid kooras Ingiriisi ah oo ah wakhti buuxa.

Sidee baan ku codsan karaa gargaar dhaqaale?

Si aad u codsatid Gunada Shaqo-doonka (Jobseeker's Allowance), Taageero Dakhli (Income Support) ama Gunada Taageerada Shaqada (Employment Support Allowance) wac **0800 055 66 88** oo la hadal la-taliye. Haddii aanad ku hadlin Ingiriisi, weydiiso saaxiib inuu kuu waco.

Waan ka weynahay da'da shaqada, maxaan codsadaa?

Haddii da'daadu tahay 60 ama aad ka weyn tahay, waxa laga yaabaa inaad awoodid inaad codsatid Deeqda Hawlgabka (Pension Credit). Waxa aad codsan kartaa adiga oo wacaya 0800 991 234. Haddii aanad Ingiriisi ku hadlin, la-taliyaha ayaa dib kuu soo wici kara isaga oo wata turjubaan. Waxa lacag lagugu siin karaa saddex bilood ka hor inta aanad codsan; weydiiso in taas lagu sameeyo marka aad teleefonka ku wacdid.

Waxa aan rabaa inaan weydiisto gargaar dhaqaale laakiin ma haysto lambar Caymis Qaran (National Insurance), wali ma codsan karaa?

Haa. Waa suurtoagal inaad codsatid gargaar dhaqaale adiga oo aan haysan lambar Caymis Qaran. Si aad u heshid gargaar dhaqaale oo aad u awoodid inaad ka shaqeysid gudaha UK waxa aad u baahan tahay lambar Caymis Qaran. Hase yeeshee, waxa aad codsan kartaa gargaar dhaqaale ka hor inta aanad helin lambar Caymis Qaran. Ha ka daalin in aad codsatid gargaar dhaqaale; waxa aad gafi doontaa lacag-siin.

Mudo intee leeg ayay qaadan doontaa ka hor inta aanad helin gargaarka dhaqaale?

Gargaarka dhaqaale lama bixin doono isla marka aad codsatid; waxay qaadan kartaa 28 maalmood ama ka badan inta laga shaqeynayo. Inta lagu jiro mudadan ma heli doontid wax

lacag ah, laakiin marka gargaarka laga shaqeeyo waxa lacagta lagaaga soo bilaabi doonaa markii aad codsatay.

Badi gargaarka dhaqaale waxa toos loogu shubi doonaa xisaab bangi (bank account). Haddii aanad lahayn xisaab bangi, waxa aad mid ka furan kartaa Xafiiska Boosta (Post Office), eeg bogga 15.

Haddii aanad lahayn wax dakhli ah gebi ahaanba oo aad u baahan tahay taageero dhaqaale oo dhakhso ah, eeg warka ku yaala **Daymaha Qalalaasaha (Crisis Loans)** ee bogga 7.

Mudo dheer ma helin wax lacag-siin ah, maxaan sameeyaa?

Haddii aad sugtay mudo dheer oo aan waxba lagu siin, weydii xarunta Jobcentre Plus ee degmadaada inay hubiyaan inay hayaan dhamaan warka ay u baahan yihiin. Waxa dhici karta inaad awoodid inaad codsatid Lacag-siin Ku-meel-gaadh ah (Interim Payment), eeg bogga 6.

Xarunta Shaqada (Jobcentre Plus)

Xafiisyada Jobcentre Plus waxay mas'uul ka yihiin maamulista badi gargaarka dhaqaale iyo inay dadka ka gargaaraan helidda shaqo. Waxay ku yaalaan wadooyin degmo oo waaweyn oo badan. Waa meeshi lagala xidhiidho badi gargaarka dhaqaale.

Haddii aad teleefonka ku codsatay Gunada Shaqo-doonka, Taageero Dakhli ama Guno Taageero Shaqo, waxa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad tagtid xarunta Jobcentre si loo xaqiijiyo wixii aad u sheegtay. Waxa muhiim ah inaad raacdid fariimaha ay ku siiyay xarunta Jobcentre sababta oo ah haddii aanad raacin waxay joojin karaan lacagtaada gargaarka.

Haddii dhibaatooyin kaa haystaan helista gargaarka dhaqaale waa inaad la xidhiidhid xarunta Jobcentre ee degmadaada. Haddii aanay ku caawin karin, wac lambarka ku yaala xagga sare ee waraaqaha aad hore uga heshay xarunta Jobcentre. Haddii aad u baahan tahay inaad koobiyo ka sameysid dukumentiyada dawladda, xaruntaada Jobcentre ayaa kuu sameyn karta koobiyo la xaiijiyay (verified copies). Taasi waxay ka fiican tahay adiga oo dukumentiyada asal ah ku dira boosta.

Gargaarka dhaqaale ee qoysaska iyo caruurta

Waxa aan haystaa caruur; ma awoodi doonaa inaan helo wax taageero dheeraad ah?

Haddii aad leedahay caruur, oo aad uur leedahay ama umuli doontid, waxa aad weydiisan kartaa taageero dheeraad ah.

Noocyadan gargaar dhaqaale ee soo socda waxa heli kara dhamaan waalidka leh caruur ee haysta oggalaansho qaxooti (refugee status), badbaadin bini'aadan, oggalaansho ku-meel-gaadhsiis ah ama oggalaansho joogitaan aan xad lahayn.

- **Gargaar Ilmo (Child Benefit)**

Haddii aad leedahay caruur ka yar 19 sannadood, waxa laga yaabaa inaad awoodid inaad heshid Gargaarka Ilmaha. Haddii aad leedahay caruur ka yar 16 sannadood, waxa aad awoodi doontaa inaad heshid Gargaarka Ilmaha.

Waa in Gargaarka Ilmaha la codsado iyada oo la isticmaalayo warqad ama foom. Waxa aad foomka heli kartaa adiga oo waca Khadka Gargaarka Ilmaha (Child Benefit Helpline) oo ah 0845 302 1444, ama adiga oo toos u gala www.direct.gov.uk oo daabacda foomka Gargaarka Ilmaha.

Haddii aad codsatid Gargaarka Ilmaha gudaha saddex bilood marka aad go'aan aqbalaad ah ka heshid sheegashadaada magangalyo, waxa markaas lacagtaada gargaarka ilmaha dib looga soo bilaabi doonaa taariikhda aad sameysay sheegashadaada magangalyo ee asalka ahayd. Waa inaad taas weydiisatid marka aad codsanaysid Gargaarka Ilmaha adiga oo taas ku qoraya foomka, ama raacinaya warqad.

- **Cashuur Dhaafista Ilmaha (Child Tax Credit)**

Cashuur Dhaafista Ilmaha waxa la siin karaa dadka leh caruur ee dakhligoodu hooseeyo ama qaata gargaar dhaqaale (welfare benefit). Xarunta Jobcentre ayaa kaa gargaari doonta inaad tan codsatid waxana sheegashada dib looga soo bilaabi karaa taariikhda aad sameysay sheegashadaada magangalyo ee asalka ahayd (eeg dusha are). Haddii dhibaato kaa haysato in Jobcentre ku gargaarto, wac Khadka Cashuur Dhaafista oo ah 0845 300 3900 oo weydiiso foomka la buuxinayo.

- **Deeqda Hooyada (Maternity Grant)**

Haddii aad heshid gargaar dhaqaale oo aad filaysid inaad umushid gudaha 11-ka todobaad ee soo socda, ama aad umushay gudaha saddexdii bilood ee tagay waxa aad xaq u leedahay inaad heshid lacag-siin hal mar ah oo dhan £500. Si aad u codsatid waa inaad buuxisid foom aad ka qaadan kartid xarunta Jobcentre ee degmadaada.

- **Deeqda Caafimaadka Uurka (Health in Pregnancy Grant)**

Haddii uurkaagu yahay ugu yaraan 25 todobaad waxa laga yaabaa inaad awoodid inaad heshid lacag dhan £190. Weydiiso dhakhtarkaaga ama umulisada foomka sheegashada; iyaga ayaa laga rabaa inay buuxiyaan qayb ka mid ah foomka. Haddii dhakhtarkaagu ama umulisadaadu aanay haynin foomamka, waxa aad wici kartaa 0845 366 7885. Foomamka waxa loo soo diri doonaa dhakhtarkaaga ama umulisadaada.

Waxa aan leeyahay naafo waxana aan u baahanahay qof i daryeela; ma heli karaa taageero dheeraad ah?

Haddii aad leedahay cudur ama naafo sidaa u daran oo keenaysa in qof ku daryeelo, ama haddii socodku dhib kugu yahay, waxa laga yaabaa inaad awoodid inaad heshid taageero dheeraad ah. Waxa tan la yidhaahdaa Guno Nololeedka Naafada (Disability Living Allowance) ama Gunada Tagista (Attendance Allowance). Waxa aad u baahan doontaa inaad buuxisid warqad ama foom, waxana taas laga soo qaadan karaa xarunta Jobcentre ee degmadaada, ama waxa aad weydiisan kartaa adiga oo waca Khadka Su'aalaha Gargaarka (Benefit Enquiry Line) oo ah 0800 882 200.

Haddii aad daryeeshid qof qaata Guno Nololeedka Naafada ama Gunada Tagista waxa laga yaabaa inaad awoodid inaad heshid taageero dheeraad ah. Waxa tan la yidhaahdaa Gunada Daryeelaha (Carer's Allowance). Waxa aad u baahan doontaa inaad buuxisid foom, waxan laga soo qaadan karaa xarunta Jobcentre ee degmadaada, ama waxa aad weydiisan kartaa mid adiga oo wacaya Khadka Su'aalaha Gargaarka.

Haddii aad qaadatid nooc kale oo ah gargaar dhaqaale, waxa laga yaabaa in aanad xaq u lahayn Gunada Daryeelaha laakiin waxa laga yaabaa inaad heshid lacag dheeraad ah oo lagu daro gargaarka aad qaadatid. Haddii aad qaadatid Gunada Daryeelaha waxa taas macnaheedu noqon karaa in qofka aad daryeeshid la siiyo lacag ka yar inta uu ahaa gargaarkiisa dhaqaale. Waa inaad habsatid saameynta ay Gunada Daryeeluhu ku yeelan karto noocyada kale ee gargaarka adiga oo wacaya Khadka Su'aalaha Gargaarka.

Waxa aan codsaday gargaar dhaqaale, laakiin ma haysto wax lacag ah. Maxaan sameeyaa?

Daynta Qalalaasaha (Crisis Loan)

Haddii aanad haysan wax lacag ah oo aanad sugi karin in gargaarkaaga dhaqaale laga shaqeeyo waxa aad codsan kartaa Dayn Qalalaase. Waxa aad taas ku weydiisan kartaa teleefonka adiga oo wacaya 0800 032 8345 ama la xidhiidhaya xarunta Jobcentre ee degmadaada. Daymaha Qalalaasaha waxa la siin karaa dadka aan lahayn wax dhigaal ah, aan lahayn qof taageeri kara ee u baahan lacag ay cunto ku iibsadaan; daymaha looma bixin karo sabab kale. Daymaha Qalalaasaha waxa la bixin karaa mudo ah laba todobaad, sidaa daraadeed ka fikir inta ay dhan tahay lacagta aad u baahan tahay mudadaas ka dibna weydiiso qadarkaas.

Fadlan la soco in taasi tahay dayn ka imanaysa xarunta Jobcentre Plus; waa inaad lacagtaas dib u bixisid. Caadi ahaan waxa taas la iskaga bixiyaa qadaro yaryar (qiyaastii £3) todobaad kasta, taasoo laga jarayo lacagtaada gargaarka dhaqaale.

Lacag-siin Ku-meel-gaadh ah (Interim Payment)

Haddii aad codsatay gargaar dhaqaale laakiin aanad helin lacagtii ugu horeysay mudo dheer ka dib, waxa aad xaruntaada Jobcentre weydiisan kartaa Lacag-siin Ku-meel-gaadh. Haddii xarunta Jobcentre ee degmadaadu aanay ku caawin karin, wac lambarka ku yaala dusha sare ee warqadda aad ka heshay xarunta Jobcentre oo weydiiso lacag-siin ku-meel-gaadh ah.

Ma shaqeysto lacag badan; ma heli karaa caawinaad dheeraad ah?

Haddii aad shaqeysid ugu yaraan 16 saacadood todobaadkii, waxa laga yaabaa inaad awoodi inaad heshid caawinaad dheeraad ah oo ah naftaada/qoyskaaga adiga oo codsanaya **Cashuur Dhaafista Dadka Shaqeeya (Working Tax Credit)**. Wac 0845 300 3900 si aad u weydiisatid warqadda ama foomka Cashuur Dhaafista (Tax Credit).

Isbeddelada ku dhaca xaaladahaaga

Haddii noloshadaada wax iska beddelaan, waxa lagaa rabaa inaad sida ugu dhakhsaha badan u sheegtid xafiiska Jobcentre Plus ee degmadaada. Halkan hoose waxa ku yaala tusaalooyin ku saabsan isbeddelada xaaladaha:

- adiga oo guursada
- adreeskaaga oo aad beddeshid
- adiga oo shaqo hela
- adiga oo xanuunsada ama jirada
- adiga oo caafimaad hela ama jiradu kaa tagtu

Waxa muhiim ah in la soo sheego isbeddelada; haddii aanad soo sheegin, waxa laga yaabaa inaad jebisid sharciga. Si aad u heshid war dheeraad ah oo ku saabsan gargaarka dhaqaale, booqo www.direct.gov.uk ama www.citizensadvice.org.uk

3. Hoyga

Goorma ayaa la iga rabaa inaan ka baxo hoyga UKBA?

Haddii go'aan laga soo saaro codsigaaga magangalyo, taageeradaada magangalyada waxay joogsan doontaa ka dib **28 maalmood**. Haddii UKBA ay ku siisay hoy, waxa lagaa filii doonaa inaad kaga baxdid 28 maalmood. Waxa aad heli doontaa warqad kuu sheegaysa goorta saxda ah ee la rabo inaad ka baxdid.

Waa maxay guryo bulsho (social housing)?

Guryo bulsho waa guryo loogu talagalay dadka u baahan guri lagu siiyo kiro la iska bixin karo. Waxa bixin kara goleyaasha (councils) degmada (local authority) ama isbahaysiyada hoyga (housing associations) (oo ah ururo aan faa'iido-doon ahayn oo madax-banaan oo hoy siiya dadka u baahan badaana dawladda ka hela deeq si ay taas u sameeyaan).

Halkee baan u tagaa gargaar?

Haddii aanad haysan meel aad ku noolatid waa inaad waaxda guryaha ee golaha degmada u tagtid.

Waxan dhakhso ugu baahanahay meel aan ku noolaado

Haddii aad ku noolayd hoyga UKBA ama aad la noolayd saaxiibo ama qaraabo oo lagu sheegay inaad ku baxdid gudaha 28 maalmood ee soo socda, waa inaad golaha codsi u gudbisid adiga oo sheegaya inaad tahay bilaa hoy (homeless). Golaha waxa saaran waajib sharci oo ah inay ku siiyaan talo oo kaa gargaaraan helitaanka meel aad ku noolaatid.

Waxa kale oo sharcigu sheegayaa in Golaha laga rabo inay hoy degdeg ah siiyaan dadka bilaa hoyga ah, ama qarka u saaran inay bilaa hoy noqdaan, iyo kuwa **jilicsan** sababo gaar ah daraadeed. Taas macnaheedu waxa weeye in aad ka jilicsan tahay qofka caadiga ah haddii ay qasab kugu tahay inaad seexatid jidka. Haddii Goluhu rumeysan yahay in taasi adiga ku khuseyso waxay taas u yaqaanaan ku-jirista 'baahi leh mudnaanta koobaad' (priority need) xagga hoyga.

Dadku waxay noqon karaan kuwo jilicsan sababo badan daraadood, tusaale ahaan:

- Dadka leh naafo ama dhibaatooyin caafimaad oo jidhka ama maskaxda ah
- Dumarka uurka leh
- Dadka caruur leh
- Dhallinta jirta 16 iyo 17
- Dadka ay daryeeleen adeegyada bulshada
- Dhibaneyaasha dab, fatahaad ama aafuoyin kale
- Waayeelka
- Dhibaneyaasha budhcadnimada guriga
- Dadka laga soo daayay xabsi
- Dadka leh walfid daroogo ama khamri

Goluhu si taxadir leh ayuu u fiirin doonaa xaaladdaada waxana uu go'aan ka gaadhi doonaa inay ku siin karaan hoy iyo in kale. Waa inay ku wareystaan si ay u ogaadaan inay ku gargaari karaan iyo in kale.

Halkee baan tagi karaa si aan u sameysto codsi ah bilaa hoy?

Waa inaad la xidhiidhid waaxda guryaha ee golaha si aad u sameysatid ballan haddii taasi suurtoagal tahay, laakiin waad iskaga tagi kartaa oo aad weydiisan kartaa inaad aragtid qof qaabilsan bilaa hoynimada. Goleyaashu waxay isku dayaan inay dadka bilaa hoyga ah u wareystaan sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah. Waxa laga yaabaa in isla markiiba lagu siiyo wareysi. Ama waxa dhici karta in Goluhu kuu sameeyo ballan aad ku soo noqotid. Haddii aad isla wakhtigaas tahay bilaa hoy, waa in goluhu ku arko isla maalintaas.

Maxaa la iga rabaa inaan u soo qaato wareysiga?

Waa inaad soo qaadatid dukumentiyoy iyo waraaqo badan oo aad leedahay intii aad kartid, waxana ugu muhiimsan:

- **Cadeynta aqoonsiga iyo sharciga imigarayshanka** – Dukumentiga Sharciga Imigarayshanka ama warqad ka timid UKBA oo sheegaysa in lagu siiyay oggalaansho joogitaan. Waxa kale oo aad u baahan tahay dukumentiyoy xaqiijinaya aqoonsiga dadka kale ee qoyska iyo waxa aad isu tihiin, sida cadeymo dhalasho.
- **Cadeyn ah inaad tahay bilaa hoy ama aad noqonaysid bilaa hoy** – warqad ka timid UKBA, ama qofka aad la noolayd, oo sheegaysa taariikhda ay tahay inaad baxdid
- **Cadeyn Adrees** – waxa fiican inay noqdaan waraaqo ka yimid hay'ado dawladdeed sida UKBA
- **Cadeyn jilicsanaan** – waraaqo iyo dukumentiyoy ku saabsan arrimaha kor lagu sheegay oo ah qof ka tirsan qoyskaaga.

Goluhu ima gargaari karo laakiin waxan ahay bilaa hoy

Qaar ka mid ah hay'adaha guryaha ee samofalka ah ayaa hoy degdeg ah siiyaa dadka bilaa hoyga. Waxa kuwaas la yidhaahdaa "hostels" ama gaboodyo habeen (night shelters) badanaana waa la wadaagaa waxana loogu talagalay joogitaan gaaban. Goobahaas 'hostel' la yidhaahdo badidoodu waxay leeyihiin liis sugitaan oo dheer ama waxay leeyihiin qodobo u-banaanaan oo gaar ah, tusaale ahaan waxa laga yaabaa in loogu talagalay dad ah da' gaar ah. Waxa liiska 'hostel' ka heli kartaa golaha degmadaada ama adiga oo baadha barahan internetka:

www.homelesslondon.org.uk
<http://england.shelter.org.uk>

Waxa aad wici kartaa khadadkan gargaar ee bilaa hoyga:

Qalalaase (Crisis) - 0844 251 0111

Gabood (Shelter) - 0808 800 4444

Badbaadada Jidka ee Landhan (London Street rescue) - 0870 383 3333

www.thamesreach.org.uk; www.pavement.org.uk; www.stmungos.org/

Waxa kale oo aad booqan kartaa Xafiiska La-talinta Muwaadiniinta ee degmadaada oo aad weydiisan kartaa inay ku siiyaan war saabsan goobaha ah 'hostel' ama xarumaha la-talinta xagga guryaha.

Sidee baan ku codsadaa hoy ah golaha?

Qof kasta oo haysta oggalaansho qaxooti, badbaadin bini'aadan ama oggalaansho ku-meel-gaadhsiis ah ayaa codsan kara hoy ah golaha isaga oo u codsanaya sida muwaadin Biriitish. Hase yeeshee, waxa jira dad badan oo raba hoy sidaa daraadeed Goluhu waxa kaliya oo uu hoy siin karaa dadka sida ugu daran ugu baahan. Waxa aad foomka codsiga ka heli kartaa waaxda hoyga ee golaha degmadaada.

Golaha ayaa go'aan ka gaadhi doonaa inta ay leeg tahay baahidaada hoy taasoo ku saleysan xaaladahaaga shakhsiyeed, waxana ay ku siin doonaan tiro ah dhibco mudnaan. Tusaale ahaan, waxa aad liiska sugitaanka kaga jiri doontaa meel sare haddii aad ku nooshahay xaalado leh sixmad weyn, ama xaalado aan caafimaad lahayn oo waxyeelo u leh caafimaadkaaga.

Golahee ayaan u tagaa?

Waxa aad codsi u gudbisan karaa gole kasta oo ah wadanka, laakiin waxay kuu diri doonaan aag kale haddii aanad la lahayn wax ah xidhiidh degmo. Waxa aad aag la leedahay xidhiidh degmo haddii:

- Aad halkaas ka shaqeysid
- Aad halkaas ku noolayd lix bilood intii lagu jiray laba iyo tobankii bilood ee tagay, ama saddex sannadood oo ka mid ah shantii sannadood ee ugu dambeeyay.
- Aad leedahay xubin qoys oo soke oo halkaas ku noolaa shan sannadood
- Aad halkaas kaga jirtay hoy ay bixisay UKBA markii aad heshay go'aanka lagugu siiyay sharci ama oggalaansho

Sidee baan ku heli karaa hoy kiro ah oo gaar loo leeyahay?

Mulkiile gaar ah oo aad guri ka kiraysatid ayaa badanaa ah ikhtiyaarka kaliya ee u banaan dadka kali ah iyo lamaanaha aan caruur lahayn ee aan ku jirin baahida mudnaanta leh. Waxa jira faa'iidooyin badan marka aad guri cid gaar ah ka kireysanaysid sababta oo ah waxa guriga lagu heli karaa badanaa si dhakhso leh waxana aad xukumi kartaa waxyaabo badan oo ku saabsan baahidaada guriga marka la eego goobta uu gurigu ku yaalo, nooca guri ee kugu haboon waxana aad dooran kartaa inaad u baahan tahay guri qalabeysan ama aan qalabeysnayn. Waxa muhiim ah inaad ku dhaqantid xaqiiqada waxa aad diyaar u tahay inaad aqbashid iyo waxa aad iska bixin kartid.

Waxa aad ka eegi kartaa internetka ama wargeysyada degmada, daaqadaha dukaanada iyo looxyada ogeysiiska ama waxa aad hoy ka raadin kartaa hay'ad kireyn guri.

Sidee baan ku bixiyaa kharashka hoyga?

Haddii aad leedahay dakhli yar, ama aad qaadatid gargaar dhaqaale, waxa aad weydiisan kartaa Gargaarka Hoyga (Housing Benefit) iyo Cashuur Dhaafista Golaha (Council Tax Benefit). Taasi waa lacag ka imanaysa golaha oo dadka lagaga gargaarayo inay iska bixiyaan kirada iyo/ama cashuurta golaha. Waxa kaliya ee aad codsan kartaa haddii aad heshiis kiro oo saxeexan la leedahay mulkiilaha guriga – kaasi waxa uu noqon karaa Golaha, isbahaysi hoy ama mulkiile gaar ah. Heshiiska kirada waxa ku qoran qadarka kirada ee la rabo inaad bixisid iyo mudada iyo shuruudaha kirada. Waxa aad foomka codsiga gargaar hoy iyo cashuur dhaafis ka soo dejisan kartaa barta internetka ee golaha degmadaada ama waxa aad tagi kartaa xafiiskooda si aad mid u soo qaadatid. Waxa muhiim ah inaad sida ugu dhakhsaha badan ee suurtoogalka ah taas u siisid waaxda gargaarka hoyga ee golaha.

Gargaar hoy (housing benefit) oo intee leeg ayaan heli doonaa?

Haddii aanad lahayn dakhli ama aad qaadatid gargaar dhaqaale, dawladdu waxay bixin doontaa kirada celceliska ah ee ka jirta aagga aad ku nooshahay. Waxa taas loo yaqaanaa Gunada Hoyga ee Degmada (Local Housing Allowance). Haddii kiradaadu ka sareyso Gunada Hoyga ee Degmada, waa inaad adigu bixisid kirada dheeraadka ah. Haddii aad ka yar tahay 25, waxa kaliya ee aad heli kartaa gargaar hoy oo ku filan qol ku yaala guri la wadaago. Waxa muhiim ah

inaad hubisid inta uu leeg yahay gargaarka hoy ee aad xaq u leedahay ka hor inta aanad saxeexin heshiis kiro.

Waxa aad tirada Gunada Hoy ee Degmada ka hubin kartaa bartan internetka:

<https://lha-direct.voa.gov.uk/Secure/Default.aspx>

Haddii aad shaqeysid oo aad leedahay dakhli hoose, waxa laga yaabaa in wali uu kuu banaan yahay xoogaa ah gargaar hoy iyo cashuur dhaafis, laakiin dakhligaaga waxa lagu dari doonaa xisaabta.

Mulkiileyaashu waxay dadka weydiistaan deebaaji – Ma awoodo inaan bixiyo.

Badi mulkiileyaashu waxay weydiistaan lacag deebaaji ah oo daboosha wixii waxyeelo mustaqbalka loo geysto guriga ama lagu daboolo kirada la bixin waayo. Waa inay deebaajigaas ku badbaadiyaan barnaamij dawladdu taageerto, si aad u heli kartid marka ay dhamaato mudada kiradu. Waxa aad xaq u leedahay badbaadadaas, sidaa daraadeed haddii mulkiilaha gurigu aanuu ku siin war ku saabsan barnaamijka gudaha laba todobaad marka aad bixisid deebaajiga, waa inaad raadsatid talo. Waxa kale oo caadi ah in kirada loo bixiyo hormaris ahaan (badanaa hal bil kiradeed) marka la bilaabo kirada. Haddii aanad haysan lacag aad ku bixisid deebaaji ama kiro hormaris ah, waxa laga yaabaa in aaggaaga uu ka jiro damaanad kiro ama barnaamij deebaaji kiro – golaha degmadaada ama hay'adaha la-talinta hoyga ayaa kuwaas wax kaaga sheegi kara.

Waxa kale oo suurtoagal ah in heshid Dayn Miisaaniyad (Budgeting Loan) ama Dayn Qalalaase oo khuseysa kirada hormariska ah aad ka heshid Jobcentre Plus, laakiin kaliya dadka qaarkii ayay taasi u banaan tahay, sidaa daraadeed marka hore weydii xafiiska Jobcentre ee degmadaada.

Haddii lagu siiyay oggalaansho qaxooti ama badbaadin bini'aadan laga bilaabo 11-ka Bisha Lixaad 2007 waxa aad codsan kartaa Daynta Dejinta (Integration Loan) oo aad ku bixisid deebaajiga kirada. Taasi waxay noqon kartaa dayn aan lahayn dulsaar. Foomka codsiga iyo qoraalka tilmaanta leh waxa laga soo dejisan karaa barta internetka ee UKBA.

Xuquuqdaada marka aad tahay kireyste gaar ah

Waxa jira sharciyo maamula nooca heshiis ee uu soo bandhigayo mulkiile, lacagta kirada ee la qaadi karo, xaaladda dayactirka ee hoyga, ammaanka dadka ku dhex nool guriga waxana ay sharciyadaasi isla markaasna dadka ka badbaadiya in guriga laga saaro iyada oo aanuu jirin ogeysiis caqli-gal ah.

Heshiiska kiradu waxa uu dejinayaa qodobada heshiiska ee u dhexeeya adiga iyo mulkiilaha guriga. Waxa jira noocyo kala duwan oo ah heshiis kiro waxana aad yeelan doontaa xuquuq kala duwan oo ku xidhan nooca heshiiska kirada. Waa inaad xafidatid koobi ah heshiiska kirada iyo cadeynta lacagta kirada ee aad bixisay. Badi heshiisyada kiradu waxay cadeynayaan in mulkiiluhu bixiyo ugu yaraan ogeysiis ah hal bil haddii uu doonayo inaad ka baxdid guriga si aad u heshid wakhti aad ku raadsatid meel kale oo aad ku noolaatid. Haddii lagu sheego inaad ku guurtid ogeysiis ka yar hal bil waa inaad u tagtid golaha degmadaada ama xarun sharci si aad u heshid talo.

Meel kale gargaar ma ka heli karaa?

Xafiiska La-talinta Muwaadiniinta (Citizens Advice Bureau - CAB) ayaa awoodi doona inuu ku siiyo talo kale. Waxa kale oo jira hay'ado aaggaaga ka bixiya talo hoy oo bilaash ah. Waxa aad war ku saabsan taas ka heli kartaa xafiiska CAB ee degmadaada.

4. Daryeelka Caafimaadka

Gudaha UK, Adeegga Caafimaadka ee Qaranka (National Health Service - NHS) ayaa tiro ah adeegyo caafimaad siisa dadka u baahan daweyn. Waxa taas la sameeyaa iyada oo la marayo: dhakhaatiir qoys (oo la yidhaahdo GP-yo), xarumo caafimaad, cisbitaalo, dhakhaatiir ilko, adeegyo umul, muraayad-yaqaano iyo farmasiileyaal. NHS waxa kale oo ay kaa gargaari karaa lidka-uurka ama qorsheynta qoyska. Waxa jira daweynno ah NHS oo la rabo inay bukaanku iska bixiyaan laakiin daweynnada qaarkood ayaa bilaash u ah dadka oo dhan.

Sidee baan daweyn uga heli karaa GP?

Haddii qof jiran yahay laakiin aanuu u bahnayn daweyn cisbitaal oo dhakhso ah, waxa uu caadi ahaan u tagaa GP (dhakhtar qoys doctor) jooga xarun caafimaad (surgery) oo degmada ah. Waxay GP-yadu sheegi doonaan oo daweyn doonaan cudurada laakiin waxay kuu gudbin doonaan takhasusleyaal kale oo ku sii haboon daweynta cudurka. Marmar badan ayaa taas macnaheedu yahay in qofka loo diro cisbitaal si loo sii daweyyo. Waxa si weyn muhiim u ah inaad iska diiwaangalisid GP ka hor inta aanad jiran sababta oo ah waa GP-gaaga cidda kuu sii gudbinaysa badi adeegyada caafimaadka ee kale.

Waxa kale oo aad talo caafimaad iyo war ku saabsan dhibaato caafimaad heli kartaa adiga oo wacaya khadka gargaarka tooska ah ee loo yaqaano NHS Direct oo ah 0845 4647. Khadkan gargaar waxa uu furan 24-ka saacadood. Bartooda internetka ee ah www.nhsdirect.nhs.uk waxa ku yaala war badan oo ku saabsan dhibaatooyinka caafimaad ee caamka ah.

Sidee baan ku heli karaa GP isla markaana sidee baan isu diiwaangaliyaa?

Liis ah dhakhaatiirka degmada ayaa laga heli karaa laybareeriga kuugu dhow, barta internetka ee NHS Direct, dadka ku nool xaafaddaada ama mulkiilaha guriga haddii aad ku nooshahay hoy ay bixisay UKBA. U hubso inaad dooratid dhakhtar kuu dhow. Waxa aad dooran kartaa haddii aad rabtid GP haween ah. Xarunta caafimaad waxay guud ahaan aqbali doontaa kaliya dadka ku nool ama jooga aagooda. Haddii aanad ku hadlin Ingiriisi kugu filan u sheeg soo-dhaweyyaha inaad u baahan tahay turjubaan marka aad sameysanaysid ballan aad ugu tagtid GP-gaaga.

Dhakharka oo aad iska diiwaangalisid macnaheedu waxa weeye adiga oo tusa warqadda sharcigaaga ama oggalaanshaha ee ka timid UKBA iyo haddii ay suurtoagal tahay cadeynta adreeskaaga. Xarunta dhakhtar waxay caadi ahaan aqbali doontaa kaliya dadka ku nool ama jooga aagooda.

Haddii wakhtigaas uu GP-gu haysto bukaan ku badan way diidi karaan inay ku diiwaangaliyaan. Haddii dhibaato kaa haysato sidii aad iska diiwaangalin lahayd GP waa inaad la xidhiidhid maamulka caafimaadka koobaad (primary health trust) ee degmadaada, oo ah hay'ad maamusha bixinta daryeelka caafimaadka ee aaggaaga. Ka dib marka aad is diiwaangalisid, kalkaaliso joogta xarunta caafimaadka ayaa ku siin doonta baadhis caafimaad oo dhameystiran. Marka aad iska diiwaangalisid GP, waxa aad sameysan kartaa ballamo si aad u tagtid xarunta caafimaadka.

Maxaa la sameeyaa wakhtiga arrin degdeg ahi jirto?

Haddii uu kugu dhaco shil ama cudur culus oo dhakhso ah waa inaad la xidhiidhid qaybta Shilka iyo Degdegga (Accident and Emergency) ee cisbitaalka kuugu dhow. Adiga ayaa halkaas is geyn kara haddii aad rabtid laakiin inta badan waxay dadku wacaan 999 oo ay weydiistaan ambalaas. Daweynta xaaladaha degdegga ah markasta waa bilaash.

Dawooyin

Marka aad u baahan tahay dawooyin dhakharkaaga guud (GP) ayaa kuu qori doona warqad dawo taasoo aad u geyn doontid farmasiile. Badi dadka waaweyn waa inay bixiyaan dawooyinka loo qoro laakiin waxay bilaash u yihiin kooxo ka mid ah dadka sida kuwa qaata gargaar dhaqaale.

5. Waxbarashada dadka waaweyn

Waa maxay Ingiriisiga Loogu Talagalay Dadka ku Hadla Luqado Kale (English for Speakers of Other Languages - ESOL)?

ESOL waxa badi lagu dhigaa koleejyada waxbarashada sii socota (further education colleges) iyo xarumaha beesha. Waxa loogu talagalay soo-guuraaga yimid UK si dadka looga gargaaro inay helaan shaqo, oo ay wax ku bartaan kuna noolaadaan UK. Waxa kale oo ESOL ay muhiim u tahay dadka raba inay helaan muwaadinnimo Biriitish.

Ma garanayaa heerka ESOL ee aan ahay?

Waxa jira lix heer oo ah ESOL. Marka aad codsatid inaad qaadatid kooras ah ESOL, koleejka ama goobta waxbarasho ayaa caadi ahaan soo diyaarin doonta qiimeyn si go'aan looga gaadho heerka kooraska ESOL ee ay tahay inaad dhigatid.

Sidee baan ku codsan karaa kooras ESOL?

Si aad ku codsatid kooras ESOL waa inaad la xidhiidhid koleejka waxbarashada sii socota ee degmadaada. Guud ahaan waxay koorasyadu bilaabmaan Bisha Sagaalaad. Haddii dhibaato kaa haysato helista koleej bixinaysa kooras ESOL oo kugu haboon waa inaad u tagtid xafiiska Jobcentre Plus oo aad weydiisatid gargaar. Badi koorasyada ESOL waa u bilaash dadka qaata gargaar dhaqaale.

Waa maxay Habka Imtixaanka Luqadda Ingiriisiga ee Caalamiga ah (International English Language Testing System - IELTS)?

IELTS waa hab imtixaan oo mideysan oo caalami ah oo loogu talagalay luqadda Ingiriisiga. Si aad jaamacad u dhigatid gudaha UK waxa guud ahaan lagama-maarmaan ah inaad gashid imtixaanka IELTS.

Badanaa waxay dadku is qoraan kooras tababar oo xoogan si ay isugu diyaariyaan imtixaanka. Si aad u heshid xarun imtixaan fadlan booqo http://www.ielts.org/test_takers_information.aspx

Waxbarashada sii socota

Waa maxay waxbarashada sii socota?

Waxbarashada sii socota waxa loola jeedaa noocyada waxbarasho ee dhaafsan waxbarashada qasabka ah laakiin ka hooseysa heerka waxbarasho ah dhigrii (waxbarasho sare). Caadi ahaan waxa taas ku jira koorasyada sida kuwa ah Heerarka A (A Levels,) Heerarka AS (AS Levels), BTEC, iyo shahaadooyinka farsamo. Badanaa waxa lagama-maarmaan ah in la dhameysto shahaadooyinka waxbarashada sii socota ee muhiimka ah si laguugu oggalaado koorasyo ah heer dhigrii.

Ma waxa la iga rabaa inaan bixiiyo kharashka koorasyada waxbarashada sii socota?

Badi koorasyada waxbarashada sii socota waa u bilaash qaxootiga.

Sidee baan ku codsan karaa koorasyo waxbarasho sii socota?

Si aad u codsatid koorasyada waxbarashada sii socota waa inaad toos ula xidhiidhid goobta waxbarasho ama hay'adda.

Waxbarashada sare

Waa maxay waxbarashada sare?

Waxbarashada sare waxa loola jeedaa koorasyada ah heer dhigrii ee lagu dhigo jaamacadaha.

Sidee baan ku codsadaa koorasyo ah waxbarasho sare?

Waxa aad raadin kartaa koorasyo waxana aad codsan kartaa adiga oo maraya hay'ad la yidhaahdo **UCAS**.

Si aad u heshid war dheeraad ah fadlan booqo www.ucas.com ama wac 0871 468 0 468.

Waa maxay heerka kharashka waxbaridda (tuition fees) ee la rabo inaan bixiyo?

Haddii lagu siiyay oggalaansho joogitaan waxa markaa aad xaq u leedahay 'fiiga ardayda wadanka' (home fees). Taas macnaheedu waxa weeye waxa lagaa qaadi doonaa isla kharashka ama fiiga waxbaridda ee laga qaado muwaadin Biriitish. Fiiga waxbaridda ee ardayda wadamada dibadda waxa laga dhigay kuwo intaas ka heer sareeya.

Haddii aad bilawday kooraskaaga adiga oo ah bixiye fiiga ardayda wadamada dibadda (overseas fees) oo oggalaansho joogitaan lagu siiyay intii aad dhiganaysay kooraska, waa inaad u sheegtid koleejkaaga ama jaamacaddaada oo aad tustid cadeynta isbeddelka sharcigaaga. Ka dib waa inay kaa qaadaan 'fiiga ardayda wadanka' sannadka waxbarasho ee ku xiga.

Haddii qof la siiyay oggalaansho joogitaan aad tahay ilmihisa, qof ay is qabaan, ama wehelkiisa madani waxa kuu banaan 'fiiga ardayda wadanka'. Waxa koleejkaagu ama jaamacaddaadu rabi doontaa inay arkaan marag-kaca sharciga qofka qoyskaaga ka tirsan iyo marag-kac ah waxa isu tihiin.

Taageero arday

Waa maxay taageero arday?

Taageero arday waa magaca la siiyay noocyo kala duwan oo ah deeqaha iyo daymaha ay ardaydu codsan karaan si ay gargaar ugu helaan fiiga waxbaridda iyo kharashyada nolosha. Waxa kaliya ee la heli karaa haddii aad dhigatid mid ka mid ah koorasyadan soo socda:

- Dhigriiga koobaad ee jaamacadda (Undergraduate degree)
- Dibloomada Qaran ee Sare (Higher National Diploma - HND)
- Shahaadada Qaran ee Sare (Higher National Certificate - HNC)
- Dibloomada Waxbarashada Sare (Diploma of Higher Education)
- Kooraska tababarka macallinka

Taageerada ardaygu waxay ka kooban tahay:

- Dayn ah fiiga waxbaridda
- Dayn ah kharashyada nolosha

- Deeq kabis ah oo loogu talagalay nooc arday oo gaar ah
- Deeq aan soo-celin lahayn oo ah ilaa £2835 sannadkii oo loogu talagalay ardayda ka yimid qoysaska dakhligoodu hooseeyo

Ma ii banaan tahay inaan codsado taageero arday?

Haddii lagu siiyay sharci ama oggalaansho qaxooti waxa markaas kuu banaan inaad codsatid taageero arday. Haddii lagu siiyay badbaadin bini'aadan, oggalaansho joogitaan ku-meel-gaadhsiis ah (discretionary leave) ama oggalaansho joogitaan aan xad lahayn waxa aad markaas u baahan tahay inaad ku noolayd UK ugu yaraan saddex sannadood ka hor inta aanad codsan taageero arday.

Sidee baan u codsadaa taageero arday?

Si aad u codsatid taageero arday waa inaad toos codsi u gudbisid **Maamulka Waxbarashada Degmada (Local Education Authority)**. Taasi waa waaxda waxbarashada ee golaha degmada.

Si aad u heshid war dheeraad ah oo ku saabsan taageerada ardayda, fadlan booqo:
<http://www.direct.gov.uk/en/EducationAndLearning/UniversityAndHigherEducation/StudentFinance/index.htm>

Si aad u heshid war dheeraad ah oo ku saabsan maalgalinta koorasyada ka dambeeya qalinjabinta (postgraduate) fadlan booqo:
http://www.direct.gov.uk/en/EducationAndLearning/UniversityAndHigherEducation/ChoicesAfterYouGraduate/DG_10012463

Sidee baan shahaadooyinka aan haysto u beddelaa si loogu ictiraafu gudaha UK?

Si aad u heshid war ku saabsan shahaadooyinka aad wadamada dibadda ka qaadatay iyo si aad u ogaatid in lagu ictiraafi karo gudaha UK iyaga oo la mid ah shahaadooyinka UK waa inaad la xidhiidhid **Xarunta Warka Aqoonsiga Waxbarashada ee Heer Qaran (National Academic Recognition Information Centre - NARIC)**. Jawaabaha ku saabsan su'aalo guud waa bilaash laakiin haddii aad u baahan tahay qiimeyn qoran oo ku saabsan shahaadooyinkaaga waxa aad bixin doontaa £47. Si aad u heshid war dheeraad ah fadlan NARIC kala xidhiidh 0871 330 7033.

Waxa kale oo jira hay'ado takhasusle leh oo qaxootiga ka gargaari kara farsamooyin gaar ah si ay u sii wataan xirfadahooda gudaha UK:

Macallimiinta Qaxootiga ah – www.refugeesintoteaching.org.uk

Injineeriinta Qaxootiga ah – www.olmec-ec.org.uk/main.cfm?Type=SF&MenuId=344

Xirfadleyda Caafimaadka ee Qaxootiga ah – www.rose.nhs.uk

Ma jiraan koorasyo kale oo aan qaadan karo si aan u hagaajiyo farsamooyinkayga oo iga gargaari kara inaan raadsado shaqo?

Waxa jira tiro balaadhan oo ah koorasyo la heli karo. Si aad u raadsatid kooras laga yaabo inaad xiisaynaysid fadlan booqo

http://careersadvice-findacourse1.direct.gov.uk/pls/hot_ca/ld_all_home.page_pls_all_home_adv

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan waxbarashada dadka waaweyn, la xidhiidh Waxbarashada Tooska ah (Learn Direct) oo leh lambarkan 0800 1011901 ama booqo www.learnirect.co.uk

Waxa aan xiiseynayaa inaan qabto shaqo tabaruc ah

Shaqada tabaruca ahi waxay kaa gargaari kartaa inaad hagaajisid suurtoogalka shaqo aad heshid waana hab lagu caawiyo dadka kale ee beesha adiga oo bixinaya wakhtigaaga iyo farsamooyinkaaga adiga oo aan helin wax lacag ah oo lagugu siiyo.

Waxay kaa gargaari kartaa inaad noqotid qof si fiican u sii yaqaana dhaqanka shaqada ee UK, waxa kale oo ay kaa gargaari kartaa inaad heshid farsamooyin iyo waayo-aragnimo cusub, aad hagaajisid Ingiriisigaaga oo aad heshid tixraac ku gargaara marka aad codsatid shaqo.

Waxa aad war dheeraad ah oo ku saabsan shaqada tabaruca ah ka heli kartaa www.volunteering.org.uk ama <http://jobseekers.direct.gov.uk>

6. Dukumentiyada Safarka

Haddii aad haysatid oggalaansho qaxooti, badbaadin bini'aadan, oggalaansho joogitaan ku-meelgaadhsiis ah ama oggalaansho joogitaan aan xad lahayn waxa aad codsan kartaa dukumentii safar si loo beddelo Dukumentigaaga Sharciga Imigarayshanka (Immigration Status Document). Dukumentiyada safarka waxa loo isticmaali karaa nooc ah warqad aqoonsi (ID) iyo sida dukumentii loo isticmaalo safar looga baxo dibadda UK. Uma safri kartid wadanka aad asal ahaan ka timid adiga oo wata dukumentii safar, waana inaad codsatid fiisa ama dal-ku-gal ka hor inta aanad u safrin dibadda UK iyo wadamada intooda badan

Waxa jira saddex nooc oo ah dukumentiiyo safar. Dukumentiga aad codsan kartid waxa uu ku xidhan sharciga aad ku joogtid gudaha UK.

Dokumentiga Safarka ee Xeerka Qaxootiga (Convention Travel Document): Oggalaansho Qaxooti

Cadeynta Safarka (Certificate of Travel): badbaadin bini'aadan, oggalaansho joogitaan oo ku-meel-gaadhsiis ah, oggalaansho joogitaan aan caadi ahayn, oggalaansho joogitaan aan xad lahayn

Haddii aad codsatid waa inaad markaas tustid UKBA in maamulka dawladdaadu 'si rasmi ah oo aan caqli-gal ahayn' kuugu diiday inay ku siiyaan baasaboort. Haddii aad ka baqaysid maamulka dawladdaada, oo taasi qayb ka tahay sheegashadaada magangalyo, qasab kuguma aha inaad taas sameysid. Haddii taasi tahay xaaladdaada waa inaad talo dheeraad ah ka raadsatid wakili sharci ama hay'ad beeleed qaxooti ka hor inta aanad codsan Cadeyn Safar.

Dokumentiga Safarka ee Qofka Bilaa Wadanka ah (Stateless Person's Travel Document): Qofka Bilaa Wadanka ah

Codsashada dukumentiiyo safar

Kharashka saddexdaa dukumentii ma aha wax isku mid ah, dukumentiyada caruurtuna way ka kharash yar yihiin. Waa inaad codsatid adiga oo buuxinaya foomka Dukumentiga Safarka ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha (Home Office Travel Document) (TD112) kaasoo aad ka daabacan kartid barta internetka ee UKBA: www.ukba.homeoffice.org.uk

Waa in qof xirfadle ahi buuxiyo bogga ugu dambeeya foomka. Sidoo kale waa inay dhabarka laba sawir baasaboort ku soo qoraan ereyada 'Kani waa sawir dhab ah oo ah suuradda' ('This is a true and correct likeness of') taasoo uu ku xigo magacaaga, lambarka tixraaca Wasaaradda Arrimaha Gudaha (Home Office reference number) iyo saxeexooda.

Qofka xirfadlaha ahi waxa ka mid noqon kuwan soo socda, laakiin waa in aanu ka tirsanayn qoyskaaga:

- dhakhtar
- Wadaad Diin
- Shaqaale Bulsho
- Sarkaal Boliis
- Macallin
- Xaakin
- Sarkaal Xabsi
- Maamule Bangi
- Qareen
- La-taliye Imigarayshan (OISC Level One/AAS Level One)

Waa in aanad qof lacag ku siin si uu kuugu buuxiyo codsiga Dukumentiga Safarka. Waa inaad kaliya lacag siisid UKBA. Dukumentigaaga Sharciga Imigarayshanka ee asalka ah ha la soo dirin codsigaaga laakiin soo dir koobi.

Waxa aad UKBA lacagta ku siin karta (oo lagu qorayo Home Office) 'credit card,' jeeg ama Jeegga Boosta (Postal Order). Jeegga Boosta waxa laga iibsan karaa Xafiiska Boosta.

Fadlan la soco in UKBA aanay dib u soo celin doonin lacagtaada haddii ay diidaan codsigaaga ama aad dib uga noqotid, sidaa daraadeed waa inaad u habsatid inuu kuu banaan yahay dukumentiga safarka ee aad codsanaysid oo aad soo raacisay dhamaan marag-kaca ay u baahan yihiin. Si aad u heshid war dheeraad ah oo ku saabsan dukumentiyada Safarka booqo www.ukba.homeoffice.gov.uk

7. Isu-keenista Qoyska

Qoyskaygu ma iman karaan UK si ay iila noolaadaan?

Haddii aad haysatid oggalaansho qaxooti, oo qoyskaagu joogo dibadda UK, qaar ka mid ah qoyskaaga ayaa laga yaabaa inay awoodaan inay kugula noolaadaan UK. Haddii aad lahayd nin/xaas aad is qabteen ka hor inta aanad iman UK, ama caruur da'doodu ka yar tahay 18 jir, waxay codsan karaan inay helaan isla sharciga aad haysatid. Marrarka qaarkood waxa suurto ah in xubnaha kale ee qoyska ay codsi dhigtaan.

Waxa tan loo yaqaana isu-keenis qoys, waana in wakiil sharci kuu sameeyo codsiyada. Waxa laga yaabaa in wakiilkii sharci ee kaa gargaaray sameynta codsigaaga magangalyo uu awoodo inuu tan kaa gargaaro. Haddii aanad shaqeynin, waa in aanad wax lacag ah ka bixin wakiil sharci. Qasab kuguma aha inaad UKBA tustid inaad taageeri kartid qoyskaaga ka hor inta aanay iman UK. Waxa aad codsi isu-keenis qoys sameyn kartaa isla marka aad heshid sharciga ama oggalaanshaha qaxootiga.

Haddii aad haysatid badbaadin bini'aadan, oggalaansho joogitaan oo ku-meel-gaadhsiis ah ama oggalaansho joogitaan aan xad lahayn oo aad rabtid inaad codsatid isu-keenis qoys waa inaad talo ka raadsatid wakiil sharci. Si aad u heshid war dheeraad ah oo ku saabsan isu-keenis qoys gudaha UK, fadlan booqo www.ukba.homeoffice.gov.uk

8. Furashada xisaab bangi

Ma furan karaa xisaab bangi?

Haddii aad haysatid oggalaansho qaxooti badbaadin bini'aadan, oggalaansho joogitaan oo ku-meel-gaadhsiis ah ama oggalaansho joogitaan aan xad lahayn, waxa aad furan kartaa xisaab bangi. Laakiin taasi waxay marmarka qaarkood noqon kartaa wax adag sababta oo ah bangiyada oo u baahan inay arkaan war badan.

Si aad u furatid xisaab bangi waxa aad u baahan doontaa inaad bangiga siisid dukumentiyoo muujinaya aqoonsigaaga, sharciga imigarayshanka iyo adreeskaaga. Bangiyada qaarkood waxay u baahan yihiin inay arkaan war ka badan ka ay rabaan bangiyada kale. Waxa aad u baahan tahay inaad tustid ugu yaraan:

- **Hal foom oo ah dukumentiga aqoonsi oo sawir leh:** Dukumentiga Sharciga Imigarayshanka, liisanka wadista, baasabooraan dhicin (kaadhahka ARC lama aqbalayo)
- **Hal cadeyn adrees:** waraaqaha ka yimid UKBA, biilal magacaagu ku yaalo, waraaqaha ka yimid Jobcentre

Waxa laga yaabaa in bangigu ku weydiiyo war intaas ka badan, tusaale ahaan, cadeynta dakhligaaga.

Xisaabta Kaadhka ee Xafiiska Boosta (Post Office Card Account)

Haddii aanad awoodin inaad furatid xisaab bangi, waxa suurto ah inaad furatid Xisaabta Kaadhka ee Xafiiska Boosta. Xisaabaha Kaadhka ee Xafiiska Boosta waxay la mid yihiin xisaab bangi. Waxa fudud in la furto xisaabta kaadhka ee Xafiiska Boosta halka laga furan lahaa xisaab bangi.

Weydiiso xafiiska Jobcentre ee degmadaada inay ku siiyaan Warqad Marti-qaad (Invitation Letter) sababta oo ah waxa aad rabtaa inaad furatid Xisaabta Kaadhka ee Xafiiska Boosta. Gee warqaddaas Xafiiska Boosta ee degmadaada si aad u furatid xisaabta.

9. La-talin sharci

Haddii aanad shaqeynin oo dakhligaagu hooseeyo waa inaad awoodid inaad heshid la-talin sharci oo bilaash ah. Dawladda UK ayaa bixin doontaa kharashkaagaaga sharci; waxa tan loo yaqaanaa Gargaar Sharci (Legal Aid). Wakiilada sharciga waxa laga yaabaa inay isugu yeedhaan qareenno, looyaro ama la-taliyeyaal sharci.

Haddii aanad shaqeynin oo aanad lahayn dakhli, waa inaan wakiilkaaga sharci kugu soo dalicin kharash sharci. Haddii uu sidaas sameeyo, waa inaad heshid wakiil sharci oo cusub.

Si aad u heshid wakiil sharci oo la shaqeyn doona Gargaarka Sharci la xidhiidh xarunta sharciga ee degmadaada, <http://www.lawcentres.org.uk> ama ka raadi barta internetka ee La-talinta Sharci ee Beesha (Community Legal Advice): <http://www.communitylegaladvice.org.uk/> ama wac 0845 345 4345.